

### Isbitaalka Ilkaha Royal ee Melbourne

720 Swanston Street

Carlton, VIC 3053

Tel: (03) 9341 1000 Fakis: (03) 9341 1111

Wecitaan bilaash ah( Tuulooyinka): 1800 833 039

### Wixii macluumaad dheeraad ah:

Weydiimaha Ballanta: 9341 1235 ama 9341 1233


Weydiimaha Unuga Qaliin Maalmeedka  
(ha u soo wecin si aad balan uga sameysatid):9341 1258

**Gal: [www.dhsv.org.au](http://www.dhsv.org.au)**

ama la hadal aqoon yahankaaga ilkaha.

### Caafimaadka afku wuxuu keena caafimaad fiican

## Tusahaaga Qaliin maalmeedka Isbitaalka Ilkaha Royal ee Melbourne



**Fadlan raac tilmaamaha warqadan ku qoran si loo hubiyo  
inaad xaq u leedahay qaliin maalmeedka.**

Magac: \_\_\_\_\_

UR NO: \_\_\_\_\_

Taariikhda Jiifinta: \_\_\_\_\_

Wakhtiga Jiifinta: \_\_\_\_\_

Fadlan soo soon laga bilaabo: \_\_\_\_\_

Adeegyada Caafimaadka Victoria waa wakaalada hogaamineysa adeegyada caafimaadka afka ee dadweynaha Gobolka, kor u qaadida caafimaadka afka, iibsiga adeegyada iyo siinta daryeel dadka Victoria.



# Macluumaadka loogu talagalay bukaanka

## Qaliin maalmeedka Isbitaalka Ilkaha Royal ee Melbourne



Bukaanka aan raacin tilmaamaha soo socda waxay noqoneysaa in joojiyo daaweyntooda.

Bukaanka lagu daaweynayo Unuga Qaliin Maalmeedka Isbitaalka Ilkaha Royal ee Melbourne waa la jiiifiyaa waxayna ka baxaan isbitaalka isla maalintaba, maadaama aysan jirin tasiilaad loogu talagalay habeen dhax. Tani waxay hubineysaa inay ku timaado oo kaleya bukaanka carqalada ugu yar ee daaweynta shakhsiyeed ee qofka bukaanka ah iyagoo ku bogsanaya raaxada gurigooda dhexdiisa.

### Nidaamkaaga waa la joojinayaa haddii:

- Aad leedahay qufac wax soo raacayaan, hargab xun, shuban, matag, xumad, nabaro ama injir maalinta aad daaweynta u ballansan tahay.
- Aadan u soo soomin sidii lagu faray
- Aadan soo ballansan gaadiid guriga kuu qaada oo gaar ah/ taksi iyo qof kula socda
- Aadan heysan qof kula jooga habeenka
- Ay kula joogaan carruur yar yar oo aan heysan qof kale oo weyn

### Waa inaad soo wargelisaa Unuga Qaliin Maalmeedka haddii:

- Aad qaadato wax daawo ah
  - ha joojin qaadashada daawada lagu qoray ilaa aad la tashato dhaktarkaaga
  - ha qaadan asbiriin ilaa laba todobaad ka hor qaliinkaaga inuu kuu qoray dhaktarkaagu mooyee.
- Aad uur leedahay
- Wax isbedel ahi ku yimaado xaaladaada caafimaad ama aad xannuunsato
- Aad naas nuujiso ilmo
- Aadan awoodin inaad timaado ballantaada

### Qaliinkaaga ka hor

Waa inaad ugu talagashaa ugu yaraan maalin badhkeed qaliinkaaga oo aad hore u sii diyaarsataa mid kasta oo ka mid ah waxyaalahan soo socda:

### Gaadiid

- Waa inaad gaadhi ka xayn 24 saac ka dib marka lagu suuxiyo
- Kuma safri kartid gaadiidka dadweynaha isla marka qaliinka lagugu sameeyo
- Bukaanka waa in guriga lagu geeyaa gaadhi gaar ah ama taksi iyadoo uu la jiro qof weyn oo masuul ah. Magaca iyo taleefanka qof weyn oo masuul ah waa in la siiyaa shaqaalaha marka lagu jiiifinayo isbitaalka.
- Wixii macluumaad ah ee ku saabsan gaadhi dhigashada (parking) fadlan tixraac khariirada ku taal dhabarka warqadan.

# Maalinta Qaliinkaaga

## Daryeel habeen

Ammaankaaga dartii, waa inuu kula joogaa qof weyn oo masuul ah habeenka ugu horeeya ee ku xigga daaweyntaada. Magaca iyo taleefanka qofka waa in la siiyaa shaqaalaha wakhtiga lagu jiihinayo isbitaalka.

## Bukaanka da'doodu ka yar tahay 18

Bukaanka da'doodu ka yar tahay 18 waxay u baahan yihiin masuul sharci ah inuu joogo inta maalinta lagu jiro. Waxaa loo baahan yahay inuu qof weyn oo keliya soo raaco bukaanka ka yar 18 ka marka la jiihiyo Unuga Qaliin Maalmeedka.

## Xannaanada Carruurta

Carruurta aan la daaweynin looma ogola inay yimaadaan Unuga Qaliin Maalmeedka iyo carruurta ka yar 16 waa inuu u joogaa qof weyn oo masuul ah goobta sugitaanka ee bannaanka.

Wixii xannaano carruureed ee loo baahan yahay waa inay diyaarsan tahay ilaa iyo fiidka hore maadaama aanan bixin karin wakhti la hubo oo aad ka soo baxaysid isbitaalka.

## Sigaar cabida

Si loo yareeyo khatarta inaad ku xannuunsato waxaa lagu talinayaa in bukaanku joojiyo sigaarka ugu yaraan laba toddobaad ka hor qaliinka. Sigaarka looma ogola dhismaha Isbitaalka Ilkaha Royal ee Melbourne.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan joojinta sigaarka wac khadka taleefanka joojinta sigaarka 13 12 58 ama la xiriir dhakhtarkaaga xaafada.

## Soomida

Haddii aadan raacin awaamiirta hoose ee soomida waa la joojinayaa qaliinkaaga.

### **QALIINKA SUBAXDII**

**Wakhtiga jiiintu wuxuu u dhaxeeyaa 7:00 subaxnimo iyo 9:00 subaxnimo.**

Waa inaan la cunin wax cunto ah, cabitaan, ama xanjo laba iyo tobanka habeenimo wixii ka danbeeya.

Laga bilaabo 12:00 subaxnimo ilaa 6:00 subaxnimo cab biyo keliya.

### **QALIINKA GALABTII**

**Wakhtiga jiiintu wuxuu u dhaxeeyaa 11:30 subaxnimo iyo 1:30 galabnimo**

Waxaad cuni kartaa quraac fudud 6:00 subaxnimo.

Waa inaan la cunin wax cunto ah, cabitaan, ama xanjo wixii ka danbeeya 7:00 subaxnimo.

Laga bilaabo 7:00 subaxnimo ilaa 11:00 subaxnimo cab biyo keliya.

## Fadlan ogsoonow liiskan soo socda:

- Iska baabii dhammaan wixii isqurxin ah iyo rinjiga cidiyaha
- Iska bixi dhammaan waxyaalaha laysku qurxiyo iyo biraha jirka la gashado
- Kaga kaalay guriga dhammaan waxyaalaha qiimaha leh
- Soo qaado kaadhka Medicare kaaga
- Soo qaado Kaadhka Daryeelka Caafimaadka ama Kaadhka Hawlgabka
- Soo qaad daawadaada
- Soo qaado buug, joornal ama muusik iyo samaacada dhegaha
- Soo qaado muraayadahaaga ama galka aad gashato contact lens ka
- U soo qaad dhar ay ku bedeshaan bukaanka da'doodu ka yar tahay sided
- Bukaanka aan saxarada iyo kaadida ceshan Karin waa inay soo qaataan dhar dheeraad ah iyo waxyaalaha ka caawiya arintan oo dheeraad ah.

## Imaanshaha

Markaad timaado Isbitaalka Ilkaha Royal ee Melbourne, fadlan aad miiska soo dhaweynta Qaliin Maalmeedka ee ku yaal dabaqa afraad.

Unuga Qaliin Maalmeeka wuxuu leeyahay saddex tiyaatar oo ay wax ku qalaan, waxaa lagaaga yeeri doonaa tiyaatarka lagu qoondeeyey, saa daraadeed waxaa laga yaabaa qof kaa danbeeyey in loo yeero marka hore, waxaana laga yaabaa inay dhacdo sugitaan dhan ilaa saddex saacadood laga soo bilaabao wakhtiga lagu jiiifinta ilaa uu ka bilowdo qaliinku.

Dulqaadkaaga waa loo bogayaa

Ka hor intaan lagu jiiifin tiyaatarka, waxaa ku arki doona kalkaaliso caafimaad, dhakhtarka suuxinta, ka ilkaha ama ka qaliinka afka.

## Lacagta Isbitaalka Ilkaha Royal ee Melbourne

### Bukaanka dadweynaha

Wax lacag ah lagaama rabo markaad keento Kaadhkaaga Daryeelka Caafimaadka ama Hawlgabka.

### Bukaanka gaarka

Bukaanka gaarka ah waa inay bixiyaa lacagta tiyaatarka/ tasiilaadkooda marka la jiiifyo. Tan waxaa lagu bixin karaa credit card, lacag cadaan ah, EFTPOS ama jeeg (loo qorayo Adeegyada Caafimaadka Ilkaha ee Victoria).

Dhakhtarkaaga qaliinka iyo ka suuxinta ayaa kuula hadli doona si toos ah si aad bixiso lacagtooda.

## Bixitaanka

Ka hor intaadan bixin waxaa lagu siin doonaa tilmaamo qoraal ah iyo afkaba oo ku saabsan sidii aad isu daryeeli lahayd naftaada ama ilmahaaga.

Haddii ay lagama maarmaan noqoto waxaa lagu qori doonaa daawo aad ka qaadan karto farmashigii aad doonto.

Carruurta, fadlan hubi inay guriga kuu yaaliin qaar ka mid ah waxyaalaha xannuunka jebiya sida panadol ama Nurofen.

Ku cab cabitaan badan guriga sida kordial, casiirka la miiray, jelly ama maraq.

Wakhtiga bixitaanka, qofka guriga ku geynayaa way soo qaadan karaan oo dhigan karaan gaadhigooda isbitaalka hortiisa soonaha 15 daqiiqo. Taasina waxay ku siinaysaa wakhti kugu filan oo lagaaga soo qaado unuga Qaliin Maalmeedka ee dabaqa afraad.